

### **Habka:**

Ilmahaaga waa in lagu qoraa sida ugu dhakhsaha badan. IRC-da ama qofka ku keenay ayaakaa caawin doona in ay kuu helaan iskuulka ugu fiican ilmahaaga. Si aad u hesho iskuulka xaafadaada wac (San Diego Unified School District) @ (619) 725-8000 ama booqo boggaan [www.sandi.net/jsbin/boundarieslookup.html?scrid=LKFM](http://www.sandi.net/jsbin/boundarieslookup.html?scrid=LKFM). : Wixii su'aalo kale ah, wac (619) 725-5668 ama booqo boggaan [www.sandi.net/facplan](http://www.sandi.net/facplan).



### **Dikomeentiyada Loo Baahan yahay:**

Si la isku qoro, iskuulku wuxuu u baahan yahay sanadkiiba in uu haysto cadeymaha da'da iyo cinwaanka ilmaha. (Wixii la xirriira da'ha waa in la xaliyaa xilliga diiwaan gelinta). Waxaa kaloo loo baahan yahay kaarka tallaalada, I-94-ka, iyo cadeynta degenaanshaha. Dikomeentiyada la aqbalayaa waa:

- Nuqulka asalka ah ee aad ku bixiso biilasha.
- Nuqulka asalka ah ee warqadda degenaanshaha (looma baahna risiitka kirada).
- Nuqulka asalka ah ee warqad ay kuu soo dirtay Xafiiska Adeega Bulshadu oo cinwaankaagu ku yaal.

•

### **Sannad Dugsiyeedka: /Caadiyan Vs. Sanad Dhan/**

Sanad dugsiyeedka Mareykanku waxa uu socdaa Sebteembar ilaa Juun. Waxaa dhici karta in fasalada qaarkood ay baxaan xagaaga (summer). Ilmahaaga waxaa lagu qori doonaa fasalo ay ka bartaan luuqada ESL. Markii aad tagto iskuulka xafadaada, hubso in aad buuxiso foom ku qoran afkaaga (waxaa laga helaa luuqad walba) kana caawi in aad iskuulkaaga u sheegto baahida ilmahaagu qabo xaga waxbarashada. Weliba weyddii wixii adeegyo ah ee ay hayaan. Iskuulada dhamaantood waxay bixiyaan barnaamijyo Ingiriis-Barasho. Iskuulada waaweyn qaarkood ayaa bixiya barnaamijyo laba luuqadood wax looga barto.

### **Saacadaha Iskuulka:**

Caadiyan iskuulku wuxuu bilowdaa 8:00 a.m. wuxuuna dhamaadaa 3:00 p.m.

***Ka Qayb-qaadashada Waalidiinta:***

*Mareykanka, waalidiinta waxaa lagu dhiiri geliyaa in ay ka qayb-qaataan waxbarashada ilmahooda. Iskuuladu waxay leeyihiin Urur Mideeya Macallimiinta-Waalidiinta (PTA) si uu u hagaajiyo xiriirka u dhexeeya ardayda, waalidiinta, shaqaalaha iyo bulshada.*

***Waajibaadka Waalidiinta Waxaa Ka Mid Ah:***

- ❖ In ay hubiyaan in ilmuhu yimaadaan iskuulka xilliga loogu talo galay iyagoo diyar ah.*
- ❖ In ay ku xirnadaan iskuulka iyo kulamada macallimiinta.*
- ❖ In ay taageeraan waxbarashada dugsigi ayna habeeyaan meel ilmuhu guriga wax uga bartaan.*
- ❖ Ay ka caawiyaa lana socdaan laylisyada shaqada guriga.*
- ❖ Ay wakhtigooda mar mar ugu tabarucaan iskuulka ilmaha.*
- ❖ Waalidiintu noqdaan macallin oo kale.*

***Sharuucda iyo Qawaaniinta Iskuulka:***

*Sharuucda San Diego iskuuladeeda iyo kan dawladduba waxay ka doonayaan ardayga in uu fasalkiisa ku neggaado. Carruurta waxay u baahan yihiin in ay wax bartaan, shaqeeyaan ayna wada cayaraan. Iskuuladu waxay leeyihiin sharuucdooda u gaarka ah waalidiintuna waa in ay xaq-dhawraan sharuucdaas. Carruurta waa in ay abaal-marin ka helaan guryahooda loogu niyad dhisayo hawsha fiican iyo dabciga ay iskuulkooda la joogaan. Weyddii iskuulka wixii caawimaad ah ee aad uga baahan tahay sharuucdiisa.*

***Fasaxyada iyo Jadwalka Iskuulka:***

*Jadwalada iskuulku waxay muujiyaan taariikhaha dugsigi iyo maalmaha fasaxyada. Jadwalku wuxuu kaloo muujiyaa faystooyinka sida Thanksgivings-ka, maalinta Madaxweynaha (President's Day), Maalinta Xuska (Memorial Day) iyo Maalinta Xoriyadda (Independence Day) oo kale. Haddii aad doonayso in ilmahaagu iskuulka ka maqnaadaan maalin aad xusaysaan farxad diimeed, waa in aad iskuulka iyo maamulka la socodsiiisaa mar hore una sheegtaa maalinka aad rabtaan, heshiisna ogolaansho xilligaas inta aan la gaarin ka hor.*

***Barnaamijyada Quraacda iyo qadada:***

*Haddii aad tahay qoys dhaqaale-liita, ilmahaagu waxay xaq ugu yeelan karaan Qado-Bilaash ah iskuulkeeda/kiisa. Ka hubi xafiiska iskuulka arrintan.*